



## Dugsiyada Sarre PPS waxa ay soo dhaweynayaan ardayda fasalada 8<sup>aad</sup>

Ardayda iman doonto Dugsiga Sarre waa soo booqan karaan dugsiyada sarre ee dariskooda, iskuulada badiilka ah ama kuwa leh manhajka gaarka ah, taasi oo kulanada macluumaaadka dhammaan dugsiyada degmada lagaga hadlayo la qaban doono inta u dhaxeysa bsiha Oktoobar ilaa Febraayo. Tani waxay u farsad weyn u tahay in ardaydu ay booqdaan iyaga oo daawanaya dugsiga sarre ee mustaqbalka ay tegi doonaan, sidoo kalena waxa ay wax badan ka ogaan doonaan arrimaha ku saabsan waxbarashada iyo barnaamijyada uu bixin doono iskuulku.

Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland ee wax ka barta dugsiyada dariskooda ama kuwa jecel inay soo codsadaan iskuulada manhajka gaarka leh sida, Benson Polytechnic ama Dugsiga Sare-Kulliyada Waxbarashada Horumarsan ee Jefferson. Qoysaska waxa sidoo kale ay soo codsan karaan Metropolitan Learning Center (MLC), dugsiga sarre ee badiilka ah. **Codsiyada bakhtiyaanasiibka Dugsiga Sarre ee Benson, Jefferson iyo MLC waxaa la aqbalayaa inta u dhaxaysa bisha Noofember 13<sup>keeda</sup> ilaa bisha Diisembar 1<sup>deeda</sup>. Sanadkani bakhtiyaanasiibku waqtigii sanadadii hore wuu ka soo hor marayaa marka laga garab dhigo waqtiyadii la qaban jiray sanadadii hore.**

Dhammaan ardayda fasalada sideedaad ee nawaaxiga Jefferson waxa ay u baahan yihiin inay doortaan Jefferson ama dugsiyada sarre ee lagu qorey sidii ay ugu addeegi lahaayeen bisha Diisembar 8<sup>deeda</sup>. Wuxaad la xiriirtaa la-taliyahaaga fasalka sideedaad wixii macluumaaad dheeraad ah ee aad u baahan tahay ama waxaad kala soo baxdaa foomka labada meeleynoond halkani [www.pps.net/schoolchoice](http://www.pps.net/schoolchoice).

Ardayda aan ka soo qeybgali karin habeenka macluumaaadka, iskuulada qaarkood waxa ay u fidinayaan in ay iskuulka yimaadaan si ay u booqdaan qaybihiisa kale duwan ama ay fursad u siinayaan in ardayda qaar ka mid ahi ay barto qaybihiisa kala duwan ee iskuulka. Ardayda waa in ay soo wacaan iskuulka ay xiiseynayaan ama ay booqdaan online si ay wax uga ogaadaan shuruucda iskuulka.

Wax badan ka ogow oo ku saabsan dib u cusbooneysiinta dugsiga sarre ee Dugsiyada Dadweynaha Portland adiga oo tegaya halkan [School Building Improvement Bond](#).

### 2017-18 Habeenada Macluumaaadka Fasalada Sideedaad

#### Dugsiga Sarre ee Benson Polytechnic

Oktoobar. 24, 6-8 habeenimo.

Maaro 15-16, 6-9 p.m. Bandhig Farsamo (Tech Show)

#### Dugsiga Sarre ee Cleveland

#### “Bridging the Gap”

Febraayo. 8, 7-9 habeenimo.

**Dugsiga Sarre ee “Discover Franklin”**  
Noofembar. 14, 6:30-8:30 habeenimo.

**Dugsiga Sarre ee Grant @ Dhismaha Marshall Campus**  
**Goob Cusub**  
3905 SE 91st Ave Portland, OR 97266  
Noofembar. 16, 6-8 habeenimo.

**Dugsiga Sarre-Kulliyada ee Waxbarashada Horumarsan Jefferson**  
Oktoobar. 26, 6-7:30 habeenimo.  
Noofembar. 15, 6:30-8 habeenimo.

**Dugsiga Sarre ee Lincoln**  
Diisembar. 12, 6-7:30 habeenimo.

**Dugsiga Sarre ee Madison**  
Noofembar. 14, 6:15-8 habeenimo.

**Metropolitan Learning Center**  
Noofembar. 14, 6-7:30 habeenimo.  
Noofembar. 28, 6-7:30 habeenimo.  
Febraayo. 13, 9:30-11 subaxnimo.  
Febraayo. 27, 6-7:30 habeenimo.

**Dugsiga Sarre ee Roosevelt**  
Noofembar. 29, 6-8 habeenimo.

**Dugsiga Sarre ee Wilson**  
Noofembar. 2, 6-8:30 habeenimo.